



Abril 2017

Waalidiinta ama Wakiilada Mudan oo Ardayda Baranaayo Ingiriisiga:

Sharciyada gobolka iyo dawlada ayaa u baahan degmadaha dugsiyada ku yaalo Kaaliforniya inay sannad kasta ardayda hore loogu tilmaamey inay baranayaan Ingiriisiga siyaan imtixaan ku saabsan aqoonta luuqada Ingiriisiga. Gudaha Kaaliforniya imtixaankaan waxaa looga yaqaanaa Imtixaanka Horumarka Luuqada Ingiriisiga Ee Kaaliforniya (California English Language Development Test [CELDT]). Natiijooyinka CELDT waxay caawinaan in la cabbiro siduu arday kasta oga horumarayo dhinaca aqoonta Ingiriisiga xaga meelaha dhagaysiga, hadalka, akhriska, iyo qoraalka. CELDT sidoo kale waxaa waaye mid ka mid ah shuruudaha loo isticmaalo dib u kala soocida (reclassification).

Laga bilaabo sannad dugsiya 2017-2018, gobolka Kaaliforniya ayaa soo saari doono imtixaan aqoonta luuqada Ingiriisiga oo cusub oo loo yaqaano Qiimaynta Aqoonta Luuqada Ingiriisiga Oo Loogu Talagalay Kaaliforniya (English Language Proficiency Assessments for California [ELPAC]), kaasoo beddeli doono CELDT. Natiijooyinka ELPAC ayaa sii wadi doono inay cabbiraan horumarka ay ardayda ka gaarayaan dhinaca aqoonta Ingiriisiga xaga meelaha dhagaysiga, hadalka, akhriska iyo qoraalka iyo sidoo kale waxaa loo isticmaali doonaa si ah shuruud dib u kala soocida. Xiligaan hada taagan, gobolka Kaaliforniya ilaa hada ma soo saarin Shuruudaha Dib U Kala Soocida (Reclassification Criteria) cusub.

Xiligii sannadyaashi hore, CELDT waxaa la bixin jirey xili imtixaameed oo u dhexeeya Luulyo iyo Oktoobar. Arrintaan ELPAC'ka ayey isku beddeli doontaa, xiliga cusub oo imtixaanada wuxuu noqon doonaa xiliga u dhexeeyaa Febraayo iyo Maarso oo 2018. Macalimiinta, shaqaalaha dugsiya iyo shaqaalaha kale oo degmada dugsiya ayaa heli doono tababar ku saabsan sida loo bixiyo imtixaanka xiliga Janaayo iyo Febraayo, 2018.

Hadii aad qabtid su'aalo dheeraad ah oo khuseeyo ELPAC, waxaan kugu dhiirigelineynaa inaa la xiriirtid dugsiyaada ama la xiriirtid Xafiiska Barashada Luuqada (Office of Language Acquisition) oo laga heli karo [ola@sandi.net](mailto:ola@sandi.net). Waxaa dheeraad ah, in lagugu soo dhawaynaayo inaad ikhtiyaarkaada oga shaqaysid (volunteer) dugsiya iyo oga qayb-qaadatid Guddiga U'doodka Ardayda Baranaayo Ingiriisiga (English Learner Advisory Committee [ELAC]) oo dugsiya sidaa u sii heshid akhbaarta ugu cusub oo ku saabsan ELPAC. Hadii aad qabtid wax su'aalo oo khuseeyo natiijooyinkii CELDT oo hore, dib u kala soocida ama ilmaaga booska wax barashada oo la geeyey, fadlan la xiriir dugsiya ilmahaaga xiliga saacadaha dugsiya.

Si daacadnimo ah,

Sandra S. Cephas  
Agaasime  
Xafiiska Barashada Luuqada (Office of Language Acquisition)  
619-725-7266  
[ola@sandi.net](mailto:ola@sandi.net)